Abaartii Dabadheer, 1974-1975: Xeryihii Gargaarka, Beer iyo Caynabo iyo Kaalintii Takhaatiirtii Xooggii Dalka Soomaaliyeed

W.Q Dr. Axmed Dalmar

Maarso 6, 2017

Odhaahda Tifaftirka: *Guud ahaan Bariga Afrika, gaar ahaan Soomaaliya, waxaa saamaysay Abaar ba'an (2015) oo loogu magac daray "Siman", taasi oo sintay xoolo iyo dad-ba. Dad lagu qiyaasay 6.2 milyan ayaa la sheegey in ay la il daran yihiin macaluul, silmarkaana qarka u saaran in ay gaajo u dhintaan. Abaartan Siman oo ka hortegeedu iyo wacyigelinta caalamka ee dhinaca Dowladda Soomaaliya uu aad u liitay, ayaa hadda dhibaatadeedii ay sii faafaysaa iyada oo Soomaaliya oo dhan ku fiday. Qoraalkan oo horey ugu soo baxay WardheerNews Seb 23, 2012, oo uu diyaariyay Dr. Axmed Dalmar oo ka mid ahaa Takhaatiirtii u gurmatay Abaartaasi Dhabadheer, ayaa si qoto dheer uga waramaya Abaartaasi Dabadheer ee sanadihii 1974-75 tabaalaysay Soomaaliya, iyo ababaaulkii ku aadanaa sidii looga hortegi laha oo loo maareeyn lahaa. Haddaba WardheerNews waxa ay akhritayaasheeda la wadaageysaa qoraalkan ku saabsan qorshayaashii ku aadanaa sidii loo maareeyey Abaartaasi Dabadheer, si markaasi looga faa'ideysto aqoontii laga korodhsaday Dabadheer. Waxaanu dhawaan idinla wadaagi doonaa Insh Aallah, waraysi aanu gacanta ku heyno oo aanu la yeelanayno Dr. Axmed Dalmar, iasaga oo ka warimi doona Abaarta hadda dalka ka taagan iyo sidii wax looga qaban lahaa, iyo waayo aragnimadii laga dhaxlay Abaartii Dabadheer.*

'Sida loo il xun yahay looma Alle la'a, wixii rag u koco oo Rabbi aqbalo waa rumoobaan' Maahmaahyo Soomaali ah.

Guudmar:

Abaaro badan baa soo maray Soomaaliya oo galay suugaanta sida **Hawaara iyo Harga-Cuna** oo ku jirey gabaygii Hadraawi "abaartii Hawaara iyo Harga-Cuna mar baa tahay". Laakiin mid aan horay u soo marin baa Soomaaliya asiibtay sannadihii 1974-1975tii. Waxay laysay xoolihii iyadoo hal malyan oo xoolo dhaqata ahi ku cayroobeen, dhaqaalahoodiina ku baaba'ay. Dad badan baa ku le'eday abaartaas nafaqo darro iyo cudurro awgood. Dawladdii Soomaaliyeed oo markaas jirtay ayadoo la kaashanaysay Caalamka iyo weliba Midowga Soofiyeti (Soviet Union) oo ay Soomaaliya saaxiib dhaw ahaayeen, waxay abaabushay xeryo gargaar. Dadkii intii ka badbaaday abaartana

Copyright © 2017 WardheerNews.com

waxay dajisey koonfurta Soomaaliya iyo xeebaha dalka, halkaasoo iskaashatooyin beereed iyo kaluumaysi looga abaabulay. Waxaa lagu guulaysaty in badankeed la baajiyo waxyeeladii abaarta**.**

Qormadani waxay ku saabsan tahay kaalintii ay ka qaateen Takhaatiirtii Xoogga Dalka Soomaaliyeed maamulka xeryihii gargaarka, siiba labadii xero ee ugu darnaa, **Beer iyo Caynabo**.



Gargaarkii Dowladda ee Abaartii Dabadheer

Arar

Abaaruhu si wareegta ah bay uga dhacaan Soomaaliya, waxaana la qiyaasaa in 5tii sanaba, laba sano ay abaar yihiin. Saddex xilli roobaad oo baaqday ama roobabkoodu aad u yaraayeen, iyo dalalka dariska ah oo ayagana ay abaari haleeshay, waxay sababeen in Abaar aan horay u soo marin Soomaaliya ay ku habsato sannadkii 1974tii.

Inkastoo abaartaasi ay ka darrayd kuwii horoo dhan, haddana waxay ku soo beegantay xilli ay Soomaaliya ka socdeen arrimo badan oo muhim u ahaa wax ka qabashada abaartaas, waxaana ka mid ahaa:

1. Dawladdii Soomaaliya oo markaa jirtay, ma yeelin sidii Itoobiyadii Xayle Selaase oo qarsatay abaartaas la mid ahayd; ee waxay adduunka u bandhigtay abaarta baaxaddeeda;

Copyright © 2017 WardheerNews.com

madaxweynaha Soomaaliyana wuxuu adduunka ka codsaday in kaalmo lala soo gaaro mar uu ka khudbaynayey Qaramada Midoobay asagoo ahaa xilligaas madaxa Ururka Midowga Afrika (OAU) bishii October 1974; adduunkuna qaylo dhaantaas waa ka jawaabay.

2. Arrinta kaloo ay ku soo beegan tay waa ololihii horumarinta reer miyiga (Agoosto 1974-Maarso 1975) oo 25,000 oo ardayda dugsiyada sare loo diray miyiga. Waxaa la yiraahdaa sabab ayagaa u ahaa in abaarta baaxaddeeda la ogaado. *Ololohii Horumarinta Reermiyiga, Qoriddii afka Soomaaliga iyo Maarayntii Abaartii dabadheer waxaa loo aqoonsaday saddexda arrimood oo lagu xasuusto dowladdii kacaanki, libta xoogeedase waxaa leh dadkii Soomaaliyeed oo hirgeliyey arrimahaas.*

3. Ruushka iyo Soomaaliya oo xiriirkoodu aad u wanagsanaa ilaa xad markii Itoobiya meesha soo gashay in Gromyko (Foreign minister) uu yiraahdo ha laga fiirsado Itoobiya hubka la siinayo (calaaqaadkeena Sooamaliya armay wax yeeshaa). Sidoo kale dibolomaasi Soomaali ah oo markii calaaqaadka la kala goostay safaaradda Soomaaliya ee Moscow joogay, wuxuu ii sheegay in xaalka Itoobiya iyo Soomaaliya uu muran weyn ka dhex abuuray Xisbigii shuuciga ahaa iyo Dowladda USSR, oo xisbiguna Itoobiya la saftay, dowladduna (siiba militarigu) Soomaaliya, xisbigaana adkaaday.

Waxaa kaloo xusid mudan in waqtigaas 1974 ay Jaamacadda ummadda Soomaliyeed eeyan weli soo saarin takhaatiir. Takhaatiirta ugu badan waagaas waxay ahaayeen takhaatiirtii xoogga dalka Soomaaliyeed oo tababar ku soo qaatay Kirov Medical Military Academy (St. Petersburg, Russia) oo ka mid ah amaba ugu horeysey kulliyadaha caafimaadka laga barto, ayna ka shaqayn jireen culimo adduunkoo dhan laga yiqiin sida Pavlov, Ivan Petrovic (conditional reflex), Korotkov, Nicolai (korotkov sounds, blood pressure).

Waxqabadkii Dawladda

Dawladdu ma sahlan abaarta ee isla markii laga qaylo keenay oo la ogaaday baaxaddeeda, waxay ku soo rogtay dalka xaalad deg-deg ah (State of Emergency) si waxwalba loogu jiheeyo xagga abaarta. Dhibaatada abaartu intaas waa sii kordhaysay, gargaarka iyo waxqabadka dawladduna waa kordhayeen, laakiin marna ma gaarin heer ay daboolaan baahidii jirtay. Khibrad looma lahayn abaar baaxaddaas leh, dalku wuxuu ahaa dal sabool ah oo soo koraya, laakiin waa la dadaalayey, hawsha gargaaarkuna waa socotay. Nasiib darro waxqabadkii caadiga ahaa ee gargaarka (biyodhaamis, raashin u qaybin) xal waa noqonwaayeen, khasabna waxaa noqday in xeryo gargaar la furo. Xeryihii gargarka ee ugu horeeyey waxaa La furay bishii Desember 1974 tiradooduna markii dambe waxay gaartay ilaa 20 xero oo ay ku jireen qiyaastii 268,597 qof.

Mar haddii dalku galay xaalad deg-deg ah (oo la mid ah xaalad dagaal), waxaa laga fursan waayey in loo habar wacdo takhaatiirtii Xoogga Dalka oo laga faa'iidaysto khibradooda (expertise) xaaladaha deg-degga ah.

Copyright © 2017 WardheerNews.com

Abaartu isku si uma haleelin gobollada, meelaha abaartu aad u haleeshayna waxaa ka mid ahaa gobolka Togdheer iyo ku aadkiisa "H*owd iyo reserv area"* oo aan ololihii horumarinta reer miyiguna gaarin. Mar dambe ayaa laga war helay dadkaas waxaana loo daadgureeyey labadii xero ee ku aadanaa aagaas BEER, iyo CAYNABO. Labadaas xero oo si isdaba joog ah dad aad u liita lagu soo daad guraynayey, waa ka tan bateen awooddii shaqaalihii xeryahaas iyo madaxdii gobolkaba. Beer ayey ahayd meesha ugu dhibaata badnayd oo dhimashadu boqol ay kor u dhaafaysay/maalintii.

Dawladdu waxay go'aan ku gaartay in labadaas xero maamulkooda lagu wareejiyo ciidammada Xoogga Dalka (Qaybtii 26aad), caafimaadka xeryahaasna waxaa loo xilsaaray takhaatiirtii Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Hawshii Takhaatiirta

Bishii Janaayo 1975 ayaa toban takhtar oo ka tirsan xoogga dalka labadaas xero loo diray; kuwaasoo isla maalin gudaheed bilaabay in ay ka hawlgalaan labadaas xero. Laba kooxood baa loo qaybiyey oo loo kala diray labada xero. Labada xeraba waxaa taakulaynayey ururkii Burco fadhiyey ee Xoogga Dalka, waxaana maamulka guud ee labada xero loo magacaabay laba sarkaal sare oo ka tirsanaa qaybta 26aad.

Cudurrada labada xero

Cudurrada labadaas xero lagala kulmay, caadina u ahaa xeryaha gargaarka oo dhan waxaa ka mid ahaa: **nafaqodarro, jadeeco iyo shuban**. Cudurradaas oo isbiirsaday ayaa sabab u ahaa tiro badnaanta dhimashada iyo bukaanka.

Nafaqodarradu waa halista caafimaad oo ugu daran oo saamayneysey ama saamaysaba dadka abaaruhu haleelaan, siiba caruurta. Madaama ay dadku xoolo dhaqato ahaayeen, dheefta xoolahana ku noolaayeen, nafaqodarrada ugu horeysa oo haleeshay waxay ahayd vitamin A la'aan iyo "protein" la'aan. Nafaqadarradu waxay hoos u dhigtay adkaysigii (is difaacidii) qofku u lahaa cudurrada, markaasaa si sahal ah ay halis ugu noqonayaan in cudur kasta ku dhici karo. Inkastoo carruurta badankood ay u dhimanayeen jadeeco iyo shuban, haddana in cudurradaas si sahal loo qaado, looguna dhinto waxaa sabab u ahayd nafaqodarrada. Daraasado badan waxay tilmaamayaan in nafaqadarrada dhexe ama darani ay 80% dhimashada carruurta ay sabab u yihiin

jadeeco - Layaab malahayn in jadeeco ka dilaacdo xeryaha waayo kumanyaal qof oo soo barakacay markay is dhexgalaan waa khasab in cudurrada qaarkood si saf mar ah (epidemic) ugu faafaan dadka. Intaas waxaa dheer carruurta xeryaha oo aan helin tallaal abaarta ka hor; xeryuhuna awood uma lahayn in ay tallaalaan caruurta inta aan cudurku ku dhicin ooy tallaalka xammili kareen, ama siyaaba kale u xakameeyaan saf-marka jadeecada.

Shubanka labadiisa noocba (shuban biyood iyo dabadhiig), joogtay u ahaayeen dadka barakacay oo xeryaha ku jira, siiba dadka reer miyiga ah oo hab nadaafadeedkoodu hooseeyo, siina wata hab nololeedkoodii baadiyaha oo sahlaya faafinta shubanka.

Copyright © 2017 WardheerNews.com

Intaas waxaa dheer, cudurradii horay u jiray sida (TB, Malaria, Dengue fever) oo isqaadsiintoodu badato madaama isdhexgalkii dadku batay.

Abaarta laftigeedu waxay kaloo keentaa jahawareer maskaxeed iyo fikir (psychological trauma). Inkastoo takhaatiirtu eeyan takhasus u lahayn cilmi-nafsiga haddana intii tabartooda ahayd waxay ku dadaaleen in ay yareeyaan dhibtaas. Waxyaalaha la qabtay waxaa ka mid ahaa: in dadka la xushmeeyo, loo naxo, aan marna la taabsiin wadcigooda. Tan ugu weyn waxay ahayd in aan loogu abaal sheegan waxa loo qabanayo lana tuso in xaq ay u leeyihiin.

Xaaladda labada xero markaan tagnay:

Xerada Beer

Xerada Beer oo qiyaastii 20 km xagga bari ka xigta Burco waxaa saldhig u ahaa Dugsigii dhexe ee tuuladaas oo dhismayaal fiicani ku yaaleen. Waxaa xerada ku jiray qiyaastii 30 kun oo qof, xeraduna waxy u qaybsanayd xaafado, xaafidaba tay ka dambayseyna waa ka dhimasha iyo dhibaata badnayd. Guud ahaan dhimashadu waxay gaaraysay in **boqol ka badan maalintii,** markay takhaatiirta xooggu yimaadeen, waxaana loo dhimanayey cudurradaas aan kor ku soo sheegay, dhimshaduna carruutay u badnayd. Xaaladda xeradu aad bay u liidatay. Dhismayaasha waxaa guryo ka dhigtay shaqaalihii, bukaankiina waxay daadsanaayeen waababka iyo teendhooyinka. Daawada iyo raashinku waa isku dhex daadsanaayeen.

Waxqabad kasta waxaa asal u ah habeynta iyo abaabulka, hawshiina takhaatiirtu taas ayey ka bilaabeen.

Xaafadihii aqal aqal iyo teendho teendhaa loo maray si loo soo saaro carruurta jirran, isbitaakana loo dhigo. Waxaa soo baxday in cudurro halis ahi ay ka jiraan xerada. Taasi waxay keentay markii dawladdii iyo khubaradii lala tashaday in la go'aamiyey in xerada la xiro oo aan dad dambe soo galin. Dhismayaashii oo dhan waxaa loo rogay isbitaal la jiifiyo dadka inta ugu liidata. Xaafadaha laftigooda waxaa laga sameeye bara caafimaad oo bukaan socod ahaan u shaqeeya, bukaan jiif ahaana loo isticmaalo xaaladaha sahlan. Xaafad kasta waxaa loo xilsaary takhtar maamula bartaas caafimaad, wixii ka batana u soo dira isbitaalka.

Daawadii iyo raashinkii is dhex daadsanaa waa la kala saaray, waana la diiwaan galiyey. Raashinka nafaqada leh iyo daawooyinka waxaa lagu soo rogay in ay takhaatiirta keliyihi qori karaan si qof walba baahidiisa loo tixgaliyo.

Mar haddii nafaqodarradu noqotay hooyadii dhibaatooyinkoo dhan, cadawga lala dagaalamayaana meesha ugu fudud oo laga abaari karo ay ahayd, waxaa la abaabulay baro lagu nafaqeeyo caruurta inta afka wax ka qaadan karta. Nasiib wanaag waxaa la haystay raashin nafaqo fiican leh oo adduunka laga helay. Nafaqayntu kaalin weyn bay ka qaadatay soo celinta jirka iyo la dagaalanka cudurada.

Copyright © 2017 WardheerNews.com

Mar haddii la xiray xerada, qorsha lagu hawlgalana la dejiyey, shaqadu haba hawl badnaatee waa isku dubadhacday; Laba toddobaad gudahoodna dhimashadii waxay bilowday in ay hoos u dhacdo ilaa bishii Abriil aakhirkeeda ay gaartay caadi ***(0,1 dhimasho/maalintii)***.

Xerada Caynabo

Xero cusub oo waqti yar ka hor la aasaasay bay ahayd. Meesha ay ku taalna waxay ahayd meel dabeecad ahaan qallafsan (bannaan iyo dabayl), hal gurina kama taagnayn. Waxaa hoy u ahaa dadka xerada ku jira waabab iyo teendhooyin; xafiisyo iyo bakhaarana waxaa u ahaa sandaqado. Musqulo in laga qodo waxay khasabtay in ciidanka miinoyinka khibradooda qarxiska la adeegsado. Bay'addii oo sidaas ah waxaa u dheerayd in si isdaba joog ah loogu soo daadguraynayey dad tabaalaysan, soo rafaaday, nafaqodarro tii ugu xumaydna hayso; markii xeradii Beer la xirayna tirada dadka soo galaya xerada waa laban laabatay; waxay noqotay xerada keliya oo qaxooti qaabilaysay, markii dambana waxay noqotay xeradii ugu dambaysey xeryihii gargaarka.

Takhaatiirtu sidii saaxibadoodii Beer, waxay dagsadeen hab iyo abaabul ay u maareeyaan hawsha sugaysa, laakiin arrimahaas aan kor ku xusay daraadood, xeradu waxay noqotay hoygii safmarada (epidemics) Jadeecada iyo Shubanka, dhimashadiina cirkay isku shareertay. Hawl aan la arag oo la maqal ayaa la soo gudboonaatay takhaatiirtii iyo shaqaalihii xerada; markay hadba xaafad caafimaadkeeda xakameeyaan, mid kaloo cusub baa bilaabata. Sidaas daraadeed ma suurtoobin in dhimashadu joogsato bisha Abriil (sida Beer), ilayn ilaa markaas dad cusub oo rafaadsan, qaarkoodna markii dambe galay liiska dhimashada ayaa xerada soo galayey. Laakiin waxay ku guulaysteen ayagoo duruufahaasi haystaan in 2/3 dhimashadii ay yareeyaan.

Isbadalkii labada Koox

Bishii Abriil 1975 aakhirkeeda waxaa xeryaha soo booqday wafdi uu madaxweynuhu hoggaaminayey si ay u eegaan xaaladda xeryaha. Xaaladda xeryuhu sidaan soo sheegnay waxay ahayd Beer oo ladnaatay, iyo Caynabo oo hawshu weli ka socoto. Waxaa laysla gartay in laysku baddelo labada koox takhaatiireed, si loo nasiyo kooxdii Caynabo oo runtii aan hal mar istaagin afartaas bilood. Koox walba shaqadeedii bay halkaas ka biloowday, roobabkii guguna waa bilowdeen, qaxooti cusubina sooma galin Caynabo; isla bishii Maajana dhimashadii waxay gaartay caadi (0,1 dhimasho/maalintii).

Rariddii

Iskaashiga Midowga Soofiyeti (USSR) iyo Soomaaliya markii hore wuxuu u badnaa dhinca militariga oo la wada ogyahay sidii ay u dhiseen xooggii dalka ilaa ay gaarsiiyeen heer uu ka mid noqdo 3-4ta ciidan oo Afrikada madow u xoog badan; markii danbena heshiiskii wuxuu ku fiday iskaashiga dhaqaalaha. Aad baa Ruushku u kordhiyey kaalmadii dhaqaalaha. Bishii Juun 1975 Soomaaliya iyo USSR waxay kala saxiixdeen heshiis iskaashi dhaqaale oo cusub oo gaarayey ilaa $52 milyan, waxayna ballan qaadeen in ay ka qayb qaadanayaan qorshaha dib u dejinta dadkii abaaruhu cayreeyeen oo xeryaha ku jirey.

Copyright © 2017 WardheerNews.com

Dawladda USSR waxay keentay diyaarado nooca **AN 12** xamuul iyo 165 baabuuro waaweyn oo dadka lagu raro, markii dambana dawladdaa lagu wareejiyey. Waxay kaloo ay keeneen Cisbitaalo guuraya "Mobile hospitals", daawo, cunto iyo teendhooyin.

Isla bishaas Juun labada xeraba waxaa laga bilaabay isu diyaarinta rariddii, xerada Caynabana waxaa maamulkeeda iyo raridda maamulkeedaba lagu wareejiyey takhaatiirta. Isku si looma arkayn raridda oo dadkii qaar waxay ku noqdeen degaanadoodii. Caynabo waxay lahayd gego diyaardeed dabiici ah oo si sahal ah ay ugu soo dagaan diyaaradihii AN 12. Caynaba waxaa laga raray 27,000 oo ilaa 2 kun laga keenay xeryaha Haadla (Gar'adag) iyo Bixin (Ceel Afweyn). Beer waxaa laga raray 17 kun oo ayada dad badani waa ka noqdeen.

Rariddu waxay socotay June ilaa Agoosto; waxaa la raray guud ahaan 90,000 oo loo raray iskaashatooyinkii beeraha iyo kallumaysiga. 49% waxaa laga raray labadaas xero. Dhimashada guud oo abaarta waxay ahayd 20,000, iyadoo 10,000 (50%) ay ku dhinteen labadaan xero. Abaartii waxaa la dhammeeyay 15tii Agoosto 1975.

Dhibaatadu intaas waa ka badan lahayd haddaan dadaalkaas la muujin. Khibrad la'aan, horumar la'aan iyo inkastoo dawlad iyo shacaba la dadaalay, haddana qaybta fayadhowrka (public health) dalka oo aan-horumarsanayn ayaa caqabad weyn ahayd oo sahli weyday in awoodii (khibraddii) oo dhan la isticmaallo**.**

Gabagabo

Inkastoo dad badani ku dhinteen kuna cayroobeen abaarta, haddana dhibaatadu intaas waa ka sii badnaan lahayd, lagamana soo kaban kareen haddaan dadaalkii iyo isxilsaarkii la muujiyey aan la muujin. Ilaahay mahaddiis dadkii xeryahaas laga raray qaar badan baa heer sare ka gaaray xagga aqoonta, ganacsiga iyo diinta.

Libta arrintaas waa la wadaagay dowlad iyo shacab. Labadaas xero oo aan kor ku soo sheegnay libteeda si gooni ah waxaa u leh: takhaatiirtii iyo kalkaaliyeyaashii la socday ee xooggii dalka, labadii takhtar (pediatricians) oo wasaaradda caafimaadka ahaa, kalkaaliyeyaashii ka yimid dugsiga kalkaaliyeyaasha Hargeysa, shaqaalihii Bisha cas, ardaydii horumarinta reer miyiga, iyo ardadii Jaamacadda siiba kulliyadaha Injineeriya iyo Joolajiya intaan ka xasuusto.

Dadkaas aan soo tiriyey qaar waa dhinteen (allaha u nxariisto), intii kalana adduunkay ku kala firirsan yihiin, jasaakumu allah, waajib laydin ku lahaa baad gudateen. Inteena noolna nooli kulanto.

Casharkii laga bartay

Mar haddii abaaruhu shanti sanaba hal mar haleelayaan Soomaaliya, waxaa fiican in qorshe loo samaysto oo si joogta ah loogu diyaar garoobo (fiiri sida adduunku ugu diyaar garoobo duufaanaha iyo musiibooyinkoo dhan). Waa run oo Soomaaliya waa dal sabool ah, laakiin inkastoo hadda aan

Copyright © 2017 WardheerNews.com

dawlad dhexe jirin waa la dhaamaa sidii la ahaa waagii abaartii dabadheer haddii la eego war isgaarsiinta, ganacsiga iyo is maamulidda gobollada.

Madaama abaartu haleesho xoolo dhaqatada waxaa ila quman in laga hirgeliyo meelaha deggan oo nabadda ah, maamulana lehna barnaamij horumarinta reer miyiga oo ah:

1. Dabagal joogto ah oo lagu hayo xaaladda xoolo dhaqatada (xoolaha iyo daaqa).
Meelaha oomanaha ah oo ceelal laga qodo ama si kale biyaha loo gaarsiiyo. Cawska oo la beero, lana kaydiyo, Xoolaha oo la baro in caysh la siiyo iyo caafimaadka xooloha oo la daryeelo.

2. In la aasaaso heer degmo iyo gobol hay'ad maaraysa xaaladaha deg-degga ah- (Emergency management agency) oo arrimahaas daba gasha, la socota xaaladda xoolodhaqata, saadaalisa abaarta, qorshaysata wax ka qabadka haddii loo baahdo (raashin, daawo, lacag, shaqaale).

3. Xagga Caafimaadka: Baraarujin iyo wacyi galin joogta ah oo loo fidiyo reer miyiga, si looga dhaadhiciyo waxtarka tallaalka, nadaafadda iyo nafaqada. Dadka Soomaalida badankood miyi iyo tuulay ku nool yihiin, sidaas daraadeed tallaal aan la gaarsiin reer miyiga iyo tuulooyinka, in lagu faano oo weliba la sheegto in dadkii oo dhan la tallaalay, cudurrada qaarkoodna la dabargooyey waa hafar la hafrayo dadkaas.

Dr. Axmed Dalmar
Email:dalmar@intergate.com

---

*Dr. Axmad Dalmar wuxuu ka mid ahaa takhaatiirtii Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee ka qayb qaatay taakuleeynta dadkii ku tabaalaysmay abaartii **Dabadheer**, ee ku habsatay Soomaaliya 1974-75 wuxuuna Dr. Axmed ku kasbaday Bilad Qalin (Silver) ah.*

Copyright © 2017 WardheerNews.com